| | |
|---|---|
| Ciise | (Abitazione) wuxuu noqonayaa hooy, (abitante) wuxuu noqonayaa deggane, (abitare) waxay noqonaysaa degid, (casa) waxay noqonaysaa, guri, aqal, hooy, minan, Intaasaan fiirinayaa siduu u duubayo. |
| Su'aal | Hooyo, yaa dhisa aqal, aqalka dhismihiisa yaa iska leh? |
| Jawaab | Aqalka dhismihiisa waxaa iska leh bilcaanta. |
| S | Ma jirtaa marka aqalka la dhisaayo waxyaalo la akhriyo iyo wax la sheego, wax mataqaanaa la yiraahdo; Allow naga haay, ma jiraan mise waa un la iska dhisaa? |
| J | Waxaa la yiraahdaa Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Allow aqalka ii bannaani. |
| S | Aqalka ma waxaa lagu tilmaamaa inuu odagu leeyahay ama inay habartu leedahay? |
| J | Maya aqalka waxaa iska leh hooyo. |
| S | Ma jirtaa maalmo la yiraahdo maanta aqalka yaan la dhisin, maanta oo kale aqal lama dhisi karo oo waa maalin nuxuus oo waa maalin saas eh, maalmo la yiraahdo ma jirtaa? |
| J | Waa jirtaa naxsi waaye yaan la dhisin aqalka, maanta aqalka dhismo ma leh, waa ayaamo naxsi. |
| S | Beryaha la yiraahdo beryo go'an ma la yaqaan, maxaa ka mid ah? |
| J | Waa la yaqaan, Arbaca-goonyaal aa la yiraahaa, arbaca-goonyaal aqalka yaan la dhisin. |
| S | Arbaca goonyaal maxaa lagu jeedaa? |
| J | Waa beri xun Arbaco-goonyaal oo la yiraaho aqalka yaan la dhisin iyo cidda yaan la rarin, reerka yaan la rarin. |
| S | Reerka lama raro oo aqalka lama dhiso oo lama furo miyaa? |
| J | Lama furo, lama dhiso, oo lama guuro, haa oo lama guuro oo waa arbaco-goonyaad. |
| S | Montare e smontare waa dhisid iyo furid, marka la dhisayo dhisid keliya aa la yiraahdaa sow maaha? |
| J | Dhisid keliyahaa la yiraahdaa, aqalka dhis. |
| S | Markii la kala daadinayo maxaa la yiraahdaa? |

J Aqalka furfur.

S Reerka markow meel dhow oo aan meesha ka fogayn u guurayo magac gaar ah ma leeyahay?

J Berrinka dhow ayaa loo guurayaa, berrinkaas dhow.

S Daldalasho wax la yiraahdo ma jiraan?

J Haa berrinkaas dhow aa la degaa, ama berrinkaas dhow aa lagu daldalaa labadaba. Daldalasho (riminerana waxay ahayd een tanna waxaa weeye nagaasho waaye). Nadiifinta aqalka, markii la nadiifinayo oo wasakhda iyo laga nadiifinayo. Aqalka xaaqa, aqalka hagaaji ama hagaaji oo xaaq.

S Intaas markaan ka baxno waxaanu gelaynaa dhigahaan gelaynaa meeqaa noocoo jirta dhigaha aqalku leeyahay?

J Dhiguhu waa kuwo, waxaa la yiraahdaa kuwo waa qabax, dhiguhu waa maranye dhiguhu waa galalyooti, saddexda mid ayaa jira.

S Waxaad iiga warantaa qabax markaan suu u samaysanyahay iiga sheekee?

J Qabaxa wuxuu u samaysan yahay; xididka geedka laga qodo yaa la yiraahdaa.

S Waa xididka keligiis sow maaha oon waxba ku duubnayn?

J Xididka geedka laga qoro oon waxba ku samaysnayn keligiis la bixiyo, kaasaa qabax la yiraahdaa.

S Aqalka waa lagu dhistaa sow maaha?

J Haa! Galalooti waxaa la yiraahdaa midka saddex saddexda la isugu dhiso, dhig dhennah ayaa la duubaa, dhig kale dhennah ayaa la duubaa, mid kale saddexda saasaa la sii saaraa. Saddex dhigoodaa la isku duubaa jalalyooti iyo lammaan labadaba waa la yiraahdaa, qabacduna midda keligeed ah oo annagu aan u baahannahay oo dadkeenna u badan yihiin aa la yiraahdaa.

S Kii saddexaad oo aad ii sheegtay maxaa la yiraahdaa?

J Qabax iyo jalalyooti iyo lamaan. Haa geedaha lammaanta ah, geedaha qabaxa ah, geedahaasaa laga sameeyaa.

S Geedaha laga sameeyo maxaa ka mid ah dhigaha?

J Geedaha waxaa ka mid ah maraayga, quraca, sarmaanka, qansaxa, afartaasaa xididkooda laga sameeyaa.

S Kuwa mataqaannaa laamahooda la isticmaalo?

J Kuwa laamahooda la isticmaalo waa jiraane waxaa la yiraahdaa; mira cas, dhirtaan laga sameeyaa, mira cas.

S Markii la dhisaayo aqalka, dhig dabada dhulka loo gelshaa ma jirtaa?

J Loolka, midka loolka la yiraahdo, lool oo u dhaxeyda. Afka ugu horreeya oo laga soo galaa waxay yiraahdaan Afdhuubada, Afdhuub, dhigga u dambeeyana waxaa la yiraahdaa; gembisada, tan u dambeysa waxaa la yiraahdaa afdhuubada; gembiso iyo afdhuub (xirid iyo furfurid, dabacsan iyo dhuuqsan).

S Iiga sheekee marka waxa lagu xirxiro dhigaha?

J Waxaa laga xirxiraa xarigga geela daryankiisa laga teeco, oo habsanaanta ahoo wanaagga badan leh la qurxiyo, waxaa laga sameeyaa geela markii la qashoo feylihiisaas uu ku taaganyahay, xarigga laga sameeyo oo xarig faylka la yiraahdo aa lagu xir xiraa, labadaas – weeye xargaha fiican. Samayntana mindhaa waa laga warramaayaa iyana.

S Ka warran samaynta aqalka?

J Dhambasha mise dhigaha? – Dhigaha! –Dhigaha waxaa lagu xirxiraa saryanka geela oo waxaa la yiraahdaa maris, oo geela iyo lo'da iyo ariga saddexda u kala go'a.

S Waxaad iiga warrantaa dhigaha waatan markii guriga la dhisaayo, kuwa waa tan saas loo dadbaayo, kuwana waatan saas la yiraah, waatan la is dhaafiyaa.

J Dhigdhexaad, Loolka uun la yiraah.

S Waxaad ii sheegtay middaan ee.

J Lool midda la yiraahdo waa middaas afka, dul inta ka timaado saas midda kore looga celshaa. Afkana loogu qabanayo, marka horena salka dhulka u yaalla. Mar u horreydana iyadaa laga bilaaba. Markii saas afka loogu, waa kuwaas saas dhinacyada loogu joojinaayo gembesinyo aa la yiraahdaa, gembiso, afdhuub waa middaas hor laga soo guro daaha laga dhigo ah.

S Waa yahay waxaad iiga warrantaa tiirarka iyagana magacyadooda?

J Tiirarka waxaa la yiraahda; tiir dhexaad, tiir barbar, kuwa horoo afdhuubka ah oo dhirtaas hore ku magacaabanoo af dhuubka ah iyo tiir barbar iyo tiir dhexaad. Udub-dhexaad waa midka u dhexeeya oo middaas u korreeya oo joojisada camal.

| | |
|---|---|
| S | Guriga kala barkiisuu ku yaallaa miyaa. |
| J | Haa, waa haddii ma aragtay la dhiso kuwaan oo ma aragtay mundule yaalka udub-dhexaaddiisa celiya camal saas waaye. Tiir dhexaad. |
| S | Tiir ma taqaannaa, tiirarka horta shardi miyaa inay laba ganood noqdaan? |
| J | Haa labadaasayba ku joogsadaan, labada gannood oo ku taagan. |
| S | Labada gannood ma joojis baa la yiraahdaa? |
| J | Waa joojis aa la yiraahdaa, labada ganood. |
| S | Ma jiraa magac ka dhexeeya guriga intaan dhambalaha la saarin? |
| J | Waa qaawan yahay waa guri qaawan. Waa qof aan lahayn ee ma ogtahay. |
| S | Waxaad iiga warrantaa guriga dhinaciisa magac ma leeyahay? |
| J | Labadiisaan dhinac haa deyrar. |
| S | Maya, waxaan rabaa; aqalkii waa dhisan yahay waan kasay oo waa kanaa, labadiisa feerood meeshii noqon lahayd dhinacaan iyo dhinacaan magac ay leeyihiin ma jiraan gaar ah? |
| J | Waxaa ah dabbiro dhambalahaa saas loogu qabtaa, asaga keligiisa magac gaar ah ma lehee, dabbiraha. |
| S | Waxaad iiga warrantaa; dhambalaha marka iiga warran magacyadooda? |
| J | Dhambalaha magacyadooda wareeg. |
| S | Wareegu xaggay kortaa? |
| J | Saan iyo saan labada dhinac ay aqalka ka kala kortaa sida derbigaas aqalka u dhisan yahay camal, labada saas la isugu keeno, oo afkana ka bannaan, gadaalna ka bannaan, waa wareegyo, kuwaan korenawaxaa la yiraahdaa dheegsaar, dheegsaarro waa labada ayana saas looga tuuraayo, ayaamo, midda u korreyda oo labada dhig inta ka dhexaydana waxaa la yiraahdaa kor saar. |
| S | Dheegsaarka iyo ayaamuhu maxay kala yihiin? |
| J | Ayaam dhinac walbuu u dhici karaaye, haddaba dadka gobolkii wuxuu dhahaa ayaam gabalna dheegsaar, saan reer waqooyi iyo reer koonfur u kala nahay haa dheegsaar iyo ayaam, midda u |

koreydana kor saar waa korsaar.

S Kuwa yaryarka ah hoos oo gaabanna?

J Dabdhin waa dabbiro.

S Sug hooyo, hadduu aqalka saan yahay?

J Haa waa kan, waa kan. Sow saan uma dhisna waa kanoo aqalkii ma soo koobinee afkaasuu leeyahay waa kaas afkiisii sow saan uma dhisma mid saanaa la yiri, mahaas iileyn ka duleeshaa, mid kalaa hoos laga marshay oo erga ah, oo cawska celida.

S Tan yar oo hoose magaceed?

J Dadbin.

S Tan ka korreysana magaceed?

J Aayaan! Horta aqalka aan kuu sheego wuxuu leeyahay lix dhambalood.

S Marka ugu horreysa labada dhinacyada iiga warran.

J Ii kaadi midda ugu horreyda waa dabdhannadaa la xiraa, waa kuwa salka dhulka u yaalla u gaaban, kuwaas dabdhin aa la yiraahdaa, waxaa ku xiga aayaan, ku wareega, laba aayaanaa galeysa, afaraa hoos taalla, laba is xigta iyo laba is xigta, laba ayaan iyo laba dadbin afar sow maahan, waxaa ku xiga laba saas iyo saas ah, waa ayaan iyo dheegsaar labada middaad doonto iska soo hormarso, in dheegsaar la yiraahdo iyo in ayaan la yiraahdo labadoodanba middii ku soo hormarta. Waxaa ku xiga mid mahaas ka gadaal waa aqalkii dhexdiisa ma ogtahay, mahaas gadaale mid ayada oo dhan sharraxan oo sida ma aragtay isku shubka ay leedahay oo kale aan la arag saas looga gudbo, tii sow saas looguma xirin, labadii korombal saar, middii u korreyda haddana la saaray, ka warranhee, ayaan koow dheh, maya dadbin kow dheh wareeg, aayaan, korsaar, guragelis.

S Guragelistu midda dhakada ka saaran miyaa?

J Waa midda dhakada ka saaran oo u dambeyda, oo quruxda loogu tala galaye marriinka leh.

S Waxaan ku weydiinayaa dhambaluhu magacyo kala duwan ma kuu leeyihiin ayagoo loo tixraacayo mariinka ku yaal had walba?

J Waa leeyihiin.

S Ii kala saar?

J Waxay leeyihiin Goray, Gammuun, Farow, saddex sow maahan, Cago afar sow maahan, Dhaqorro, shan sow maahan, shantaas weeye; shantaasaa loo ka yaqaanaa.

S Shantaas mid walba ii fasir. Gorayga midda leh maxay tahay?

J Gorayga midda leh waxay leedahay waa ayaga dhan isku rug, hadda haatan waa ayada ii muuqata, walaxa isku shub ah waaye oo saddex, saddexaa laga bilaabaa, halkaas sow saddex dhigood maaha, dhigantaan baad ka bilaabay, tanaad ku xijinaysaa, kanaad ku xijisay, kanaad caddeyheey.

S Saddex xibnood oo midab leh. Xibinta afaraad ka boode?

J Waa ka boodee, muggii xibinta afaraad ka booddo saddexdii yaad haddana ku dhigaysaa, haddana saddex, saasay ku soconaysaa, taas goray yaa la yiraahdaa.

S Goray waa naga baxday?

J Waa naga baxday, midu gammuunaa la yiraahdaa oo maha u dambeysaa laba jawaa laga qaadaa, laba labaa laga bilaabaa, laba madow, waxaasaa kaasaa la maraa, waa laga gooyhaa saddexaa la baneeyhaa oo caddaan lagu samaynaa, cag weynaa muggaa kor laga saaraa oo u qabto yaambo, haa waa gammuun.

S Guray iyo gammuun aan haynaa?

J Yaambo waa mid meesha laga bilaabo iyo meesha ay ku dhammaato taako inta u dhexayda laga banneyhaa, inta kale laba taako wax la mid ah, iska socohaa, waa yaambo. Boqorro sida middan shanta ah waaye intaan oo la badsho, waa tanoo la badsho, oo intaasoo kale laga dhigaa ayada, tan kalena intoo kale, asaa intaa la caddayhaa haa wa boqorro; waa afar.

S Maxaa noo dhimman, shannaanaa noo dhiman?

J Goray iyo Gammuun, iyo Boqorro iyo Yaambo, waa afar, mid kalaan sheegnay, afarta waaye.

S Ee soo jeedka guriga maxaa la yiraahdaa, marka wejigiis la taagan yahay?

J Afka, afkaa la yiraahdaa.

S Irridda laga galana maxaa la yiraahdaa?

J Irridda laga galo afdhuubyadii waaye, awal aad soo martay, afdhuubka.

S Meesha wax la gashan jiray magaceedii maxay ahayd?

J Kalxamo, oo labada dhinacoo daaha lagu daahay, kalxamo, aqalka kalxankiisa geli.

S Maxaa la yiraahdaa aqalka meesha ugu dambeysoo gurada ah inta la dhiso oo kor wax lagu dhiso alaabta lagu rarto?

J Heenka-raar, aa la yiraahdaa.

S Heerka-raarka maxaa la saartaa?

J Waxaa la saartaa dhambalaha, waxaa la saartaa tebbedaha, waxaa la saartaa baaqulida, waxaa la saartaa qumbeyaalka, saas waaye.

S Aqalka marka la gelaayo la baxaayo, gelid iyo bixid keliyahaa la yiraahdaa sow maaha?

J Haahey, waa la galay guriga waa laga soo baxay.

S Ilaxirka waxaa la yiraahdaa waa maxay, Gandoob iyo ilaxir maxay la yihiin?

J Haa waxay kala yihiin waa isku sida ee magacaa un yaa loo kala wadwadaa e, kan oo ma aragtay aqalladiinaas aqalka magaalada ah inow dhexda xarig ku leeyahay. Dhulka la iska ma aragtay laga seexanaayo ee laga sheexsiinaayo qofka meesha seexaneydo kaas waaye wuxuu leeyahay Gandoob kaasi, kan baadiyada wuxuu leeyahay sar la yiraahdo lammo, oo saas kabo camal biro lagu lama lameeyo lagu dhigo oo lammo la yiraahdo, wuxuu leeyahay kibid galool, raro la yiraahdo raro, kebed galoolna waa la yiraahdaa oo saas loogu wareejiyo raan, raantu oo guriga la kala dhexdhigo. Afkaas iyo afkaasaa laysugu xiraa.

S Kebed galoolna waa la yiraahdaa!

J Midkaas lagu kala xiraayo ama laamo. Haddow harag yahay waa laamo, haddow yahay geedka kale rar la yiraahdana waa kebed galool labada.

S Kebed galoolka maxaa laga sameeyaa?

J Waxaa laga sameeya mayrax.

S Marka waa sharraxantahay oo quruxbadan tahay sow maaha?

J Haa Alla maxaa qurux ah!

S Malaga helaa baadiyahaan weli?

J Maya, dadkaanu ma yaqaano, daaroodka iyo Sacadka iyo, laakiin dadkeena naag dhif ahoo dhinacaas ka timaadaa taqaanba

waxaas. Dadkeenu ma yaqaano. Haddeese lama fiirin karo quruxda, saasuu u raaracaa aasaad guud fardaad u qabtaa, fardaha guudkooda ma aragtay? Haa, guudka fardahaad mooddaa quruxda ma fiirin kartid Kebed, Galool iyo Laamo.

S Laamada midka aad i leedahay oo haraggu ka samaysan yahay ma haragguu laba haraga isku kortolan baa?

J Waa laba isku tolan oo afkaas iyo afkaas la iska soo gelshay dhexda ka xarqaaman, waxay leedahay koobino koobino googo'anoo oo saasoo cagocaga oo la gooyayoo la gooyey.

S Inta la gooyaa la isku tolay sow maaha?

J Maya waxaan shegayaa calaamo ahaan camal ee ma go'na, oo duftii laga xiiro aa dhexda weliba Harrar walax la yiraahdo oo koobina koobina ah saas oo faraxyo faraxyo leh, ay ku dhigayaan!

S Kaasna ma dadkaasaa samaysta?

J Haa dadkaasaa sameysta waana lo' iyo geel labadaba, haraggaas.

S Marka ilaxirka dhinac waa ka gadaal guriga dhinaciisa gadaal jira, oo dadka lagu qariyo oo wixii xishoonaya la geliyo, dhinacna waa dhinacaan soke, laba magac ma kala leeyihiin labadaas meelood?

J Barbarqaawa iyo Ila-xir, qodda aan dedneyn Barbarqaawa, qodda kalana Ilaxir. Haragga harag u fiican waa geel, waa inuu harag geel ka samaysan yahay amase uu feylaha geela ka samaysan yahay, faysha geel inya la tumo oo la qurxiyo oo la wanaajiyo aa laga tidcaa tidac, tidacaa la yiraahdaa, kan oo saryaankaana asagana geelaa u fiican, waa la tidcaa ama waa la soohaa oo waa la sirgaa, sooh ha dhicin ee waa sirig, ama waa la sirgaa, ama waa la tidcaa, waana geela.

S Sirginta maxaa loola jeedaa?

J Sirginta waxaa loola jeedaa geelaad ku soo xiree sarinkana waa kuu soohan yahay, waa isku toojee sida timaha camal, markaasow laba laba yahay, saddex lagama dhigee laba lugoodaa laga dhigaa. Labadaasow u fiican yahay, lo'duna waa ku xigaa, haragga lo'aadaa ku xiga. Mid waa iska daba dhigoo waa un ka ciilbeeloo waxaa la yiraahdaa xaskul, waa un xarig camal ku ciilbeel.

S Haragga dusha laga saaro aqalka si aanu roobku u deyn magaciisa?

J Waxaa la yiraahdaa sar, sarta aqalka dusha ka saaran. Korka, dusha badanaaba lamaba dhehee, sarta aqalka korka ka saaran, oo biyo celiska ah.

S Ma lo’aa ma geelaa maxay ka kooban tahay?

J Waa lo’ waana geel, waa hadba sidii ay ku qaabisho.

S Waxaad iiga warrantaa geedda harkaweylaalista la yiraahdo, iiga warran ayadana.

J Harko weylaalis waa weylaha lo’da, waa ariga waa la isku tolaa, waa weylaalis magaceedu, ama waa lo’, waa weylaha yaryar lo’da waaweyn maahane, waa weylaha yaryar ama waa ariga.

S Ma waxaa la jeelyahay inay isku midab yihiin ama inay kala midab yihiin ama inay kala midab yihiin?

J Nooc walba kala midabna waa loogu toshaa isku midabna waa lagu toshaa; mid waa wada caddaad, midna waa neef cad iyo neef guduudan iyo neef madow, hadba dhinacaad adigu Ilaahay ku siiyee isu dalafto.

S Markii guriga la rabo in dhiilaha iyo wax la susurto xagee la suraa?

J Waxaa la surtaa haamanka gadowgooda. Haamanka ratiga markii saas loo saaro haamanka gadowgiisa, haamanka waxay leeyihiin gadowyo saas u saarsan, waxay leeyihiin walax la yiraahdo udfayaal, udfe oo saas u taagtaagan saasaa udfaha loo gelinaa saasaa loo gelihaa.

S Oo gadowga markii saas loo wareejiyo ganta yar oo ka korreysa yaa udfa la yiraahdaa miyaa?

J Haa gantaasaa udfa la yiraahdaa haanta gadowgeeda, gadow waa midda isu qoolaaban. Udfana waa usha saas loogu laabo. Oo saas u fiiqan oo lagu nabay illaa gadowga haddowsan ul lahayn wax qaban maayee, udfaa la yiraah.

S Aqalka marka gudihiisa meel wax la sursuran karo maku yaaliin oon udfayaashaas ahayn?

J Tiirarkaa la surtaa, tiirarka ganihiisa, gano uu ku magac leeyahay, tiirka gantiisa noo sura, tarmuushka sura, dhiisha sura, kirliga sura, dambiisha sura.

S Ee aqalka aqal ugu weyn magaciis?

J Aqalka aqal ugu weyn gaar uma maqal ee aqalka ugu weyn aa la iska yiraahdaa. Aqalka weyn.

S Aqalka ugu weyn meeqaa dhambalooduu qaadan karaa?

J Wuxuu qaadan karaa toddoba dhambalood kan ku xigana lix, mid waa afar, mid waa shan, waaba intaas midka ugu yaraa afar ah.

Afarta labada wareeg oon dadbin lahayn iyo labada dheegsaar oon wax kale lahayn waa afartaas.

S Waa yahay, maxaa laga sameeyaa; qalabka laga sameeyaa maxay yihiin dhambalo?

J Dhambalaha waxaa laga sameeyaa Meyro, mid waxaa la yiraah Qaloomaal, midna waxaa la yiraah Mayro-yar, labadaasaa laga sameeyaa.

S Qaloomaasha maxaa weeye?

J Qaloomaasha waxaa waaye mid adadagoo, kakanoo, xanaf lahoo, xoog lahoo dhambashiisuna aysan qurxoonayn.

S Cimriga maka cimri badan tahay midda kale?

J Kama cimri badnee, middaa yaryaraa cimri badan kana qurux badan. Haa! Taasna mayrayn yaraa la yiraahdaa midda midda fiican.

S Waxa mayrada layskula qabtaa waa xarig uun miyaa?

J Waa xarig xaskul ah.

S Xariggaas nooc gooni ah ma leeyahay?

J Maya. (cod dhexgal ah) “Haa gahnay dheh” War hadda un xaskusha sow un xarigga magaciisa gadaal looma rabo. Haa waa xaskul waxaa loo jeedaa xarigga yar yar oo kebedda lagu tolayo. Yaryaraanta oo  kaasaa gahnay la yiraahdaa, gahnay, diraqa dhidhinahoo gahnaga.

S Kan magacii?

J Kan waa gahniga laguu sheegaayo.

S Meeshaan maxaa la yiraahdaa godan?

J Meeshaan waxaa la yiraahdaa meeshii la laabay, laabiddii.

S Marka la askumayo oo la laabayo maxaa la yiraahdaa?

J Jebiska, jebiska ama unug.

S Intan maxaa la isku yiraahdaa, intan yarka ah oo laaban?

J Nud, nudaa la yiraah. Xabbaddiiba waa nud, nustaanyada iyo nudda iyo.

S Nustaanyo maxaa waaye?

J — Meel intaan oo kale saas gacanta loogu qabto, dhambashaasaad rabtaa inaad samaysato markaasaad leedahay nustaanyo ii keen waa intaanoo kale. Haa intaa xantoob ah, haahey.

S — Afar shan aqal markey meel iskula yaalliin magac gaar ah ma leeyihiin?

J — Maya afar aqal, aqal kasta mar kow keligii meel ku yaalo aqalaan dhihi karaa, afar aqal markey meel ku taal mugga ama shan ama lix ama afar waxay noqdaan ha noqdeene markay hal ka badiyaan waa aqalladaas aqalladaas day iyo aqalkaasay kala yihiine ma agtahay. Hadday laba yihiinna labadaas aqal day.

S — Laba aqal markey isku meel noqdaan magac gooni ah ma leeyihiin?

J — Maya, labadaas aqal day, markay dadku isla degayaan matalan ka soo qabo; waxaa isla degayaa Daahir iyo aniga iyo Cismaan iyo…

S — Waxaa jira dad markey wada degayaan waa la kala leeyahay jihada waa la kala leeyahay, wiilka gabadha cidda ka qabaa meel buu leeyahay, cidda gabadha laga qabo dhinac bay leedahay, abtiga dhinac buu leeyahay, odaga reerka u wey bahweynta dhinac bay leedahay, kala go'anoo haddii qolada kale dhinaceeda laga maro ay xumayn u tahay, ma jirtaa taas?

J — Soomaalidu ma laha taas, Soomaalidu waa leedahaye. – War waxaas waxna waa ka jiraan waxna kama jiraan, reer hebel bilcaanta reer hebla jeeskeeda dhinacaasi joqoqobkeeda uma adkeyso dadka, waa jirtaa horta ma runtayaa mise waa beentay Macallin? (Cod soo dhexgal ah) "Mayee waa sidaa", iyaa reer hebel uma adkeysato qoqobkeeda ciddaas reer hebel ehe, ka du'oo beesha dhinacaas gee, yey bari ka marin.

S — Maya dabeecad ahaan ma rabo anigu, wax dhaqan ahaan ah ma jiraan miyaa?

J — Wax dhaqan ahaan ah ma jiraan. (Hadal dhex gal) "Beel curaafiyuba curaafiyaa jira". Curaafyahaas sow ma ogid.

Ciise — Maya tani waa xushmo, waxay ku xirantahay waa wax si ay isu xushmeeyaan reer waqooyigaa yaqaana. (Hadal dhex gal) "Ciisow mid kalaa jirta oy yaqaaniinba, aniga iyo adiga ma aragtay aa isla deris ahoo isla dhannahay".

S — Waxaan niri aqalka midda lagu soo wareejinayo waxaa la yiraahdaa Qaarood ama Deyr!

J — Maya, ha isa saarin dayrku waa midkaan fariisiga ah.

S — Dayrku waa fariisi, sow maaha?

J Haa dayrku waa fariisi baan ku iri Qaaroodna waa midkaas aqalka dhan qirid ku ah oo xoolaha halista looga la isaga celinaayo dayrkuse waa la fariisanayaa.

S Midkii bannaanka ahaay maxan niri oo la fariisanayey asagana?

J Midkaas bannaanka ah waa magacii waaba luminayaaye xaw ahaa?!

S Dayr baad iigu sheegtay? Kii loo dhisay dadka martida halkaas oo kale ay fariisanayeen.

J Haa kii waa maqan yahay. Qaarood war ninkaan la fogeeyo xaw ahaay, Cismaan?

S Midka aan qaaroodka aqalka ahayn ama dayrka aqalka ahayn oo banaanka aqalka loo fogeeyo xow ahaay? Oo ragga iyo fariisto martida iyo.

J (Hadal dhex gal) “haa waxaa la yiraahdaa dayr. Dayr waa midkaan aqalka agtiisa aqalka ku laaban yahaye mahaas banaanka ahe mugga tagga wax la sii tago dibadda dadka loogu shido xow ahaay? Duggaal. Haa duggaalkaas hore, haa meeshaasna waa dugsi.

S Duggaalkii ka waran ee tilmaan?

J Waxaa ku kulma ragga ayaa ku sheekaystoo ku haasaawa, dabna waa lagu hor shidaa ragga isku arka si uu raggu isku arko markow xaajeysanaayo ama uu reerka u soo martiyo ayaa loo dhigaa duggaalkaas duggaalkaas marka loo dhigo waa isku arkayaa ragga waana ku xaajaystaa, waana ma aragtay ku cuteeyaan hadday doonaan.

S Dugaalka aqalka waa ka go’an yahay mar kasta sow maaha?

J Wuxuu ka samaysan yahay geedo la gooyay ee markaa la isdulsaasaaraye la isku hagaajiyay oo si fiican la isugu hagaajiyay.

S Waxaan niri xeradii waa taan sheegnay.

J Xeradii waa jebisayo, jebisyaanu ku niri, afka hore waxaa laga saaraa waa dhacan, ayadu qoolawgeeda dhammaystirka hore waa xero waa saddexdaas.

S Markii la dhamaystiro ka bacdi ayey waxay noqonaysaa xero?

J Marka hore oo oodda la dhigaayo mid walba waa la yiraahdaa, jebisaa la yiraahdaa, afka ugu horeeya waxaa la saaraa waa dhacan.

S Ardaagani waxaan ku sheegnay meesha meesha guriga dhinaciisaa oo ma la isugu yimaado oo fiidkii lagu sheekeysto hooyadu dhambashiyo ku samaysato. Waxaad kaloo ii sheegtaa meesha ay gabdhuhu seexdaan ariga hortiisa ah maxaa la yiraahdaa magac ma leedahay?

J Meesha gabdhuhu seexdaan arigga irriddiisa.

S Magac gaar ah ma leeyahay?

J Kuwana waxay dhistaan meel go’anoo dayr la yiraahdo, oo dhellahoo qoryo inya la mud mudo, qoryaa inya saas loo mud mudo aa caws korka laga saarsaaraa, meel dhellahoo maxaa la yiraahaa saas u sii jeedjeeda, saas uun loo soo gelaayo.

S Halkaasay iiga dhammaatay, wixii kalood ku darayso aqal adaa taqaan. Aqal maxaad kaloo ku daraysaa, waxaad rabto ka sheeg marka waa kuu furantahaye.

J Aqal waxaad ku daraysaa? Oon aqalka ahaynaa? Waxaan la i su’aalin miyaan anigu sheegi karaa, waxa in la isa su’aalo ay ku fiican yihiine ma ogtahay? Waxa haddaan lagu su’aalin sheekadu ma iyadaa iska tururixis u baahan mise wey isaga baahan tahay?

S Waxaad iiga warrantaa markii haamaha la tolayo, marka la unkayo haanta maxaa la yiraahdaa?

J Unug aa la yiraahdaa, markay korto oo xoogaa koraysato ay intaan noqoto Taakaa la yiraahdaa, markay intaa oo kale noqoto Qalqaladaa la yiraahdaa, markay ka baxdo sabaraa la yiraahdaa, markay dhammaaheydo Qoraa la yiraahdaa. Unug, Taako, Galgalad, Sabar, Qoor, waa kaa; kan ka korreeyana Haruub.

S Intaas markaad samaysay haantii markii samaynayo oo la xoolaynayo maxaa la yiraahdaa?

J Waxaa la yiraahdaa haan Qabada cad, Haanta cad.

S Waxaad iiga warrantaa markaa si haantii ay biyaha u celiso marka waa dhamaysaye, biyaha marka say u celiso maxaa lagu sameeyaa?

J Waxa lagu sameeyo Burrays, waa la burreeyay haantii, asal aa lagu shubay, shiilo waxa la yiraahdo aa lagu shubay, shiilaha waxaa la geliyaa dab, waa kululaahaayaa.

S Shiilashu waa dhagax sow maaha?

J Waa dhagax, la kululeeyay.

S Marka hore cararkaa lagu shubaa?

J Cararkaa lagu shubaa, mugga lagu shubo ooy ku guduudato oo dhuuxeedu qoyo aysan gubahaynin aa shiisha afka loo geliyaa.

S Ayagoo weli asalkii ku jiraa?

J Ayagoo weli asalkii ku jiraa afka loo gelaa waa buree, faw, faw, faw ay dhahee, kurteedaa waxaa ka soo kudaaya qoyaankii uurkeeda ku jiray, aa dibadda immanayaa, shabaax ka soo leh, waxaas muggii ay dhammaystiranto, waa laga daadaa, asalka shiisha wax dhan waa laga rogaa, cugaalaa deb loo saraa, qoryo saas ah oo dhaadheer aa deb loo saaraa, haantaa lagu guraa, waa lagu culaa, Catir wax la yiraahdo aa la marinaa, qudhuubaan wax la yiraahdo aa loo hormarinaa, wax la yiraahdo Jilaq aa loo hormaraa xaaddaa looga guraa, qalalaf aa lagu siihaa, markii xaadda laga gurooy safoonaato aa caano shab lagu siinaa, waa lagu rogrogaa; lagu rogrogaa, qorraxdaa la dhigaa, waa saas.

S Markaa ka bacdi waa lagu shuban karaa sow maaha?

J Markaa ka bacdi waa la dhaansan karaa. Waxaad ku xijee haddaad awooddaas u leedahay caanaha subag, subaggaasaad dhudda ka gelee, abidkeedaysan dhaceen oo kala go'ayn oo qallalayn oo biyo baxayn, oo waxay ku soo baxay sinnaan iyo wanaag, ka bacdi dhaansee, biyaad ku shubee, caanaad ku lulee.

S Hayee, haantii halkaasaan uga baxnay, dhiishuna ma sidoo kalaa?

J Dhiishuna waaba sidoo kale.

S Haamaha jira iiga warran magacyadooda meeqa noocoo haano ahaa jira?

J Haamaha jiraa waxaa u weyn Horaad, waxaa ku xiga Dambeed oo ay yartahay, horaadduna weyntahay, mid la yiraahdo Garabgelis ahoo oo biyaha lagu cabbo oo marna ay Garabgelis dhahaan oo marna ay Shaw dhahaan, haamuhu saddexdaas nooc weeye, horaad iyo dambeed, iyo garabgelis.

S Haamuha maxaa laga sameeyaa, waxyaalaha laga sameeyaa maxay yihiin?

J Haamaha waxa laga sameeyaa Qabo, Argeeg, Caw saddexdaa laga sameeyaa.

S Meeshaan malaga samaystaa haamo Caw ah?

J Haa waa laga toshtaa, markii la helo, waa laga toshaa, barigaanaa laga toshaa Abgaal dhexdiis.

S Kuwa qoranna?

J Haa kuwana waa qoraan, Qoray aa la yiraahdaa. Haamanka qoraga ah haan Qori yaa la yiraahdaa, kuwo waa bir, oo haddaa la bilaabay birtaas, haaman macdan ah oo la tumo oo shub la yiraahdo kuwaasna haddaa la bilaabay. Haamanka waxaa u horeyda Qabo, waxaa ku xiga Argeeg, waxaa ku xiga Caw, waxaa u dambeyda Macdan, haamanka macdanka oo laamayeeriga.

S Waxaad iiga warrantaa marka dhiilaha ayagana?

J Dhiilaha waa haamanka oo kale.

S Magacyo ma kala leeyihiin?

J Waxay kala leeyihiin ee dhiilasha dhiisha dhellah iyo dhiisha weyn iyo habinta saas waaye.

S Dhiil weyn iyo dhiil yar iyo habinta? Habinta maxaa looga jeedaa?

J Habinta waa midda canugga yar caanaha loogu qaado oo habartu siddo, dhiisha caanaha loogu qaado yaa habin la yiraahdaa, waana ugu yartahay dhiilaha, xagga caanaha haddii loo galana, afar-koombo qaad, laba u weyn, laba qaad, hal koombe qaad, waxaa ku xiga saddex koombe qaad, shan qaad, lix qaad, toddoba qaad, waa inta dhiiloon haanta haan roon oo garab gelista ahayn, tooddoba hadday dhaafto haanay noqonay, garan galis iyo shaw ay noqonay mar hadday toddoba dhaafto.

S Waa qiyaas fiican, dhiishaas sida ay u tolantahay magac ma kala leedahay?

J Waa kala leedahay, waxay kala leedahay; Ruubis iyo Qar.

S Ruubiska maxaa waaye sal ma leh miyaa?

J Maya, waxaa loola jeedaa, haruub aan mahaan girgirkaan ma aragtay, dhiilaha awal ma tiqiin, midi waa ahaan caano celis ku leh, duube oo la duubo, midna sida loo tolayaa qaar keligiis laga dhigay aasaa afka hoosta dhiisha loo geliyay. Ruubis aa la yiraahdaa kaas, mana fiicnoo midka qanaxaa waaye oo aan fiicnayn, midkaas duubka leh ma arkee caana celisay dhahaan oo waa midka qarka fiicanoo hinnaanta oo kale joogana oo haruubka iyo dhiishiisu is dhexgelaynin oo hadday muuqato qurxoonoo caanuhu ka daadanaynin.

S Kuwo sal ay ku fariistaan lahaa iyo kuwa aan sal lahayn oo muruxsan.

J Dhiisha sariirta leh iyo Daba la'.

S Sariir iyo daba la', aahay. Kuwo waxaan arkay dhoqol leh.

J Abgaalka isaga dhilihiisa oo dhan dhoqol waaye, (Soo dhexgal) “ka noqo waxaas” lagama noqonaaye Abgaalaa yiraa wax daran dhiilahooda oo dhan ayagoon kala magacaabin tii yareyd iyo tii weydeydba waa dhoqos.

S Haye raridda awrkana ka warran.

J Awrka rariddiisa waxaa u horeeya oo la saaraa kebedda.

S Kebedda la saaraa? Maxay ka samaysantahay?

J Kebedda waxay ka samaysantahay Mayrax, waxa geedka laga sameeyana waxaa la yiraahdaa Jeerin, Mayrax Jeerin ay ka samaysan tahay. Kebedda ka samaysan waxaa lagu xijinayaa dhambalaha aqalka la saaro, waxaa lagu xijihaa tiirarka tiba dambeedka ah, waxaa lagu xijihaa haamanka, waxaa lagu xijihaa dhigaha, waxaa lagu xjihaa sarta iyo xoodaheeda ayaa lagu xijihaa. Haa waa u dhammaatay mugga.

S Awrkaasu waa raran yahay marka?

J Waa raran yahay, waxba uma dhinna.

S Meelaha marka awrka la raro meelaha wax la gagashado wayaalaha xununka ah xafashka soo hara maxaa la yiraahdaa waxa xafashka miyaad magacaa ugu dartay ama maha la gelinaayo?

J Haa waxaa la yiraahdaa sarta hoosteeda.

S Magac kale ma leh miyaa?

J Maya, dhambalah laabkooda kuwa laadlaada miyaad hadda ka wadda. Dhambasha laabkeeda waa dhambasha ratiga la saaro saas muggii la isaga daba laabo, dhinacna waa ka laba af dhinacna waa ka soo laabantahay, aasay tiirar gashi, saasay habartu muggay tiir xun Ilmaha ku illowdo iyo kab xumoo la iloobay iyo waxarra mareegtoo la iloobay iyo waxaasaa mahaas la geliyaa, waana dhambasha laabkeeda, sarta hooskeedana waa wax kaloo oo dambiisha iyo dhiisha iyo waxaas la rarayo.

S Meesha marka ilmaha la saarayo godanoo la saarayo maxaa la yiraah?

J Gurada.

S Ma guraa la yiraahdaa?

J Ratiga guradiisa waa guraa la yirhaahdaa.

S Xarkaha ka warran, xargaha awrka midka shafka loogu xiraay,

midka dabada loogu xiraayo?

J Haa, caynka waa u horreeyaa dhafarka waa ku xigaa, kor u raraha dhigaha lagu raraayo waa ku xigaa, hoosinka dhigta lagu raraayo waa ku xigaa, hoosinka dhigta sarta lagu xirahaa oon xarig ka daba marin.

S Sug maya, waxaad ii kala saartaa caynku xaggee ku xiran yahay?

J Caynku halkaas waa midka aqalka hayoo dhan.

S Shafkuu ku xiran yahay?

J Ratiga oo dhan waxaa wax la haya waa isaga Caynkaa.

S Muxuu ka samaysan yahay caynku?

J Wuxuu ka samaysan yahay geela suunkiis, suunka geela loogu jecelyahay.

S Kii kalood ku xijisay muxuu ahaa?

J Dhafarkaa.

S Dhafarku xaggee buu ku xiranyahay?

J Wuxuu ku xiran yahay daba qaraanta iyo xeerinka saasaa inya loo geliyo dabada, aa saas lagu soo dhahaa.

S Daba gelisku muxuu yahay?

J Daba gelisku waa isku dhafarta. Haa dhafarka iyo kororradaha iyo hoosinka, hoosinka waa midka u korreeyoo ay ku dhammaato oo hawl dambe laga qabanayn ratiga.

S Kulli midka lagu soo wareejinaayo miyaa?

J Haa sarta, sarta ratiga waa la kicinaa muggaas ka dib xarig dambe loo celin maayo.

S Dhigararuhuna waa maxay?

J Waa asaga.

S Isaga hoosinka iyo dhegararuhu ma isku midaa?

J Waxa dhan waa isku wada mid. Inta la sameeyo waxaa u horreyda haanta iyo dhamasha, haanta dumarkaa sameeya, dhiilaha dumarkaa sameeyaa, haamanka dumarkaa tola.

S Maxay kaloo sameeyaan dumarka?

J Hargaha ay dhambasha ku sameeyaan.

S Horta waxaan ku weydiiyay awrka yaa rara halkan?

J Awrka raggaa rara.

S Dumarku ma raraan miyaa haddaanu dana ku khasbin?

J Annagu haddaan la weynin nin rara oo naagta aysan dad waa ahayn raggaa rara.

S Yaa dhaamiya?

J Waxaa dhaamiya ragga, dumarku ma dhaamiyo, ceebbay noqotay oo waa la caytan.

S Waxaa i tiraahdeen salsalku waa labo mid ma taqaannaa marka awrka la rarayo iyo marka la furaayo, waa kala salsal miyaa?

Maxamuud Haa.

S Ma codkaa kala duwan lagu qaadayo mise mirahaa kala duwan?

J Miraha.

S Bal hadda hallay maqshiiyo mid ah markii la rarayo, adeer Max'ed ku dhufo.

J Maxaan ku dhuftaa waaba hilmaamaye.

S Cajalada markaad aragtay miyaad hilmaantay?

Maxamuud Waxaan doonay deelow
waxaan doonay deelow
inaan dararaynoo
doonkaan yeeraa
dadna naga horreeyaa
waxaan doonay deelow
inaan sii dareernaa
docolkeena yeeraa
duulna naga dambeeyaa.

Waxaan doonay deelow inaan sii dareernaa docolkeena yeeraa; waa koorta haa koorta waaye docolku, docoleenu yeeraa duulna naga dambeeyaa; macnuhu waxaa waaye inaan innaguna sii horreynaa, nalakana dambeeyaa. Taas waxa ka mid tahay kuwii rarriinka ahaa; midna wuxuu yiri:

Nimanka toobey jiraan
iyo tilaab aan dhoweyn
Rabbi tagaabe ha dhigee

nimankii toobeey jiraan
iyo tillaabo aan dhoweyn
Rabbi tagaabi ha dhigee.

Tagaabo ha dhigee; tagaabo maxaa waaye? Waa Alla ha soo dhaweeyee waaye, midka kale ku dar. Haa!

S Mid kale ku dar!

J Sidii hunuf gabooy
ama habartii dhabe
inta kugu helhelo
kaagama harharaan.

Kaagama hareen, haa waa furriinka.

S Marka miraha micnahaa laga garanayaa kuwey kala yihiin.

J Haa micnahaa laga garanayaa kuwey kala yihiin.

Dhoomahaan dhibka leh
inaan kaa dhigdhigaa
waxaan kuula soo dhuglahaay
dhoomahan dhibka leh
inaan kaa dhig dhigaa,
haddaan caadku roob noqon
ammaan caadda biya gelin
caaslow waa kuu cabsoonnahay.

Haddaan caadku roob noqon, ammaan caadda biya gelin caaslow waa kuu cabsoonahay; waa laguu kala sheegayaa adeer baa kuu fasiraya.

Ciise Maya micnaha waan garatay.

Hurda habar hadday tahay
habaraa ku hodmi ku hodmi lahayd
iyo hooglihii ku baal jiray
haddii dhoyle roob jiro
geeduhu dhallaagaan
aa laguu dhaafi doonaa.

S Dhallaagid maxaa waaye?

J Waa laguu sheegi doonaa; haddii dhoydhe roob galo oo geeduhu dhallaagaan, ayaa laguu dhaafi doonaa, macnahooduna waxaa waaye; haddii dhulka roob jiro oo geeduhu tigaad bixiyaan ayaa lagu dhaafi doonaa, rarka lagaa dhaafi doonaa iyo dhibaatada, intay kuu dhaalaayaan waa loo dhib qaataa.

S Ku celi?

J Dhoole dhabal yac naagood
ee beerta dhoobooy
intay kuu dhalaayaan
waa loo dhib qaataa

Weli-weli adoomaad
ii waaqdhaacin beerey
waray naago sheegeen
waxba kama liloobaan.

S Waxba kama liloobaan, Liloobid maxaa waaye?

J Waxaa waaye wilic wilic addoomaad; wax addooni sheegto, iyo warey naago sheegaanba, wili wili addoomaad iyo waaqdhaacin beerrey, haa waaqdhaacinka beerey, waa Allow roob na sii waxba kama liloobaan, waxna kama soo dhashaan, adeeraana iga roon.

S Hooyo bal adna xabbad sheeg!

J Hoorrigow hoogtay
Haaman waaweynidaa
Habari kaa talidaye
Ammayba hoos kuu dilaan

Macmacnuhuna waxaa weeye; ratiyahow haamo waaweynidaa, aakhirkaaba ammay dhibaato kuu keenaan haamahaan waaweyn; Calaashaan habartii ku rartay ayaa habaar qabto ahayde aan dhib yaridaada ka talin.

S Intaan dhimman waxaan ku duubayaa magacyada geela loo bixiyo, Cismaan tiri magacyada geela loo bixiyo.

J Magacyada geela waa fara badan yihiin laakiin in kooban baan ka soo qaadanaynaa, waxaa la yiraahdaa hasha madow muus ama caynab baa la yiraahdaa, hasha dheer Caruud baa la yiraahdaa, hasha cad oo geela ka mid ah waxaa la yiraahdaa Dhuux, Bila, Caynab, Idiin, Muus, Qaayib, Maydhuub, Sulub, Hareed, Loox, '*Loox aroortii laab u rooney*', Dheeray, Cambar, Xiis, Idiin, Ballan, Webi.

S Dahabna ma jirtaa?

J Haa Dahab, Maayley Cartan, Sahan, Tiir, Carwa Humaag, Bulxo. Galool, Xuub, Korcad.

Ciise Maya bes intaas ku filan!